



waxaad u tagidoontaa Qolo Ahlu kitaab ah, hadaad u tagto ugu yeer inay qiraan in Ilaahay mooyee Ilaah kale oo xaq lagu caabudaa jirin, Maxamedna uu yahay Rasuulkii Ilaahay

Ibnu Cabbaas Allaha ka raali ahaado isaga iyo aabihiye waxaa laga wariyey inuu yiri: Rasuulka Ilaahay wuxuu ku yiri Mucaad Binu Jabal markuu u diray Yaman: ((waxaad u tagidoontaa Qolo Ahlu kitaab ah, hadaad u tagto ugu yeer inay qiraan in Ilaahay mooyee Ilaah kale oo xaq lagu caabudaa jirin, Maxamedna uu yahay Rasuulkii Ilaahay, haday intaa kaa yeelaan, u sheeg in Ilaahay ku faral yeelay shan salaadood habeen iyo maalin walba, haday intaa kaa yeelaan u sheeg in Ilaahay ku faral yeelay sadaqo laga qaadayo intooda maalka leh, oo lagu celinaayo intooda saboolka ah, haday intaa kaa yeelaan, waxaan kaaga digayaa xoolahooda kuwa ugu fiican inaad ka qaado, iskana ilaali ducada kan la dulmiyey, waayo isaga iyo Ilaahay xijaab uma dhexeeyo.

[Xadiis Saxiix ah] [Xadiis la isku waafaqay]

Nabigu scw markuu u diray Mucaad Binu Jabal Allaha ka raali ahaade dhulka Yaman isagoo daaci iyo macalin ah wuxuu u cadeeyey inuu u tagi doono Qolo Nasaaro ah, si uu isugu diyaariyo, ka dibna uu dacwada ugu yeerayo ka bilaabo siday u kala muhiimsan tahay. Wuxuu ugu yeerayaa hagaajinta caqiidada marka koowaad, taaso ah inay qiraan in Ilaahay mooyee Ilaah kale oo xaq lagu caabudo jirin, Nabi Maxamedna yahay Rasuulkii Ilaahay. Waayo iyaday Islaamka ku soo galayaan, hadii ay taas u hogaansamaan wuxuu amrayaa inay salaada oogaan, waayo waa tan ugu wayn waajibka towxiidka ka dib. Hadii ay oogaan salaada wuxuu amrayaa kuwooda xoolaha leh inay bixiyaan sakada xoolahooda siiyaana ku wooda saboolka ah, wuxuuna uga digay inuu ka qaado xoolaha kuwa ugu fiican, waayo waajibku waa dhex dhexaadka. Ka dibna wuxuu u dardaarmay inuu ka fogaado dulmiga, si aanu kan la dulmiyey u habaarin, waayo baryadiisa Ilaahay waa aqbalayaa.

<https://sunnah.global/hadeeth/so/show/3390>

